Tirakoobka 2020-ka iyo Qarsoodiga

Jawaabahaaga ku saabsan Tirakoobka 2020 waa mid aamin ah, la sugay, oo uu xafiday Sharciga Federaalka. Jawaabahaaga waxaa loo isticmaali karaa oo keliya in lagu soo saaro tirakoob - ***looma adeegsan karo wax liddi ku ah sinaba.*** *Sharci ahaan, dhammaan jawaabaha Mareykanka Xafiiska Tirakoobka qoysaska iyo Daraasadaha baarista ganacsiga waa kuwo si dhameystiran loo xifdiyay.*

Ka jawaab Tirakoobka 2020 si loo qaabeeyo mustaqbalka.

Wax ka qabashada tirakoobka waxay ka caawineysaa bulshada helitaanka maalgalinta ay u baahan yihiin waxayna ka caawinaysaa ganacsatada inay gaaraan go'aamada xogta ku dhisan ee kobcinaya dhaqaalaha. Xogta tirakoobka ayaa saameyn ku leh nolosheena maalinlaha ah, soo sheegista go'aanno la xiriira maalgelinta adeegyada iyo kaabayaasha bulshadaada, oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka, xarumaha dadka waaweyn, shaqooyinka, soo sharixida wakiilada siyaasada, wadooyinka, iskuulada, iyo ganacsiyada. In kabadan $ 675 bilyan oo doolar oo ay maalgalinayso federaalku ayaa dib ugu noqota gobolada iyo bulshooyinka maxalliga ah sanad walba iyadoo lagu saleynayo xogta tirakoobka.

Jawaabahaaga tirakoobka waa kuwo sugan oo aamin ah.

Xafiiska Tirakoobka waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inuu ilaaliyo warbixin kasta oo shaqsiyeedka aan aruurino isla markaana si adag u ilaalino. Xafiiska Tirakoobka ayaa u isticmaali kara jawaabahaaga oo kaliya soo saarista tirakoobka. Xaqiiqdii, shaqaale kasta oo ka tirsan Xafiiska Tirakoobka wuxuu ku dhaartay inuu ilaalinayo macluumaadkaaga nolol shakhsiyeed. Jawaabahaaga looma adeegsan karo ujeeddooyinka fulinta sharciga ama si loo go'aamiyo u-qalmitaankaaga shaqsiyeed ee gargaarka dawladda.

Sharci ahaan, jawaabahaaga looma adeegsan karo wax liddi kugu ah.

Sharci ahaan, jawaabahaaga tirakoobka looma adeegsan karo wixii liddi kugu ah ha ahaato hay'ad dowladeed ama maxkamad sinaba - sida Xafiiska Dambi Baadhista Federalka (FBI), Hay'adda Sirdoonka Dhexe (CIA), Waaxda Amniga Gudaha (DHS), Laanta Dhaqangelinta Socdaalka iyo Kastamyada Maraykanka (ICE) MAREYKANKA. Sharciga wuxuu farayaa Xafiiska Tirakoobka inuu ilaaliyo macluumaadkaaga qarsoodiga ah isla markaana u isticmaalo jawaabahaaga tirakoobka oo kaliya.

Sharciga waa mid-ma jiro macluumaad shakhsiyeed oo la wadaagi karo.

Sharciga Mareykanka Qodobka 13naad Xafiiska Tirakoobku ma sii deyn karo macluumaad kasta oo lagu garan karo oo ku saabsan shaqsiyaadka,
Reeraha, ama ganacsiyada, xitaa hay'adaha sharci fulinta.

Sharcigu wuxuu dhigayaa in macluumaadka la soo ururiyey loo isticmaali karo oo keliya ujeedooyin tirakoob oo aan ujeedo kale lahayn.

Si loo taageero cilmi baarista taariikhiga ah, koodhka
Qodobka 13naad ee sharciga Mareykanku wuxuu u oggolaanayaa Maamulka Diiwaannada Qaranka inay fasaxaan diiwaannada tirakoobka oo keliya 72 sano kadib.

Dhammaan shaqaalaha Xafiiska Tirakoobku waxay ku dhaarteen waqti dheer ah si ay u ilaaliyaan macluumaadkaaga shakhsiyeed, wixii xadgudub ahna waxaa ku dhaca ganaax ilaa $250,000 iyo/ama 5 sano oo xabsi ah.

United States® Census 2020

Ma jiraan wax ka reebani

Sharciga wuxuu farayaa Xafiiska Tirakoobka inuu ka ilaaliyo xogta qarsoodiga ah ee qof walba. Sharci ahaan, jawaabahaaga looma adeegsan karo wax liddi kugu ah haba ahaato wakaalad dawladeed ama maxkamad sinaba. Xafiiska Tirakoobka lama wadaagi doono jawaabaha shaqsiyaadka hay'adaha fulinta socdaalka, wakaaladaha sharci fulinta, ama uma oggolaanayaan in macluumaadkaas loo isticmaalo in lagu go'aamiyo u-qalmitaanka dheefaha dowladda. Qodobka 13 wuxuu si cad u caddaynayaa in xogta aan soo uruurinayno loo isticmaali karo oo keliya ujeeddooyin tirakoob - uma oggolaan karno in loo isticmaalo wax kale, oo ay ku jiraan xoojinta sharciga.

Waa ikhtiyaarkaaga: waxaad uga jawaabi kartaa si amaan ah onlineka, boostada, ama taleefan.

Waxaad haysataa xulashada aad ugaga jawaabayso online-ka, boostada ama taleefanka Qoysaska aan kusoo jawaabin mid kamid ah qaababkaas waxaa soo booqan doona tirokoob qaade si uu macluumaadka uga soo qaado. Ayadoon la eegeyn sida aad uga jawaabeyso, macluumaadkaaga qaaska ah waxaa ilaaliya sharciga.

Jawaabahaaga onlineku way ka badqabaan xatooyo iyo waxyeelooyinka kaleba.

Xafiiska Tirakoobku wuxuu qaadaa taxaddar xoog leh si looga ilaaliyo jawaabaha onlineka ah. Dhammaan macluumaadka lagu soo gudbiyo khadka tooska ah ee internetka waxaa loo rogaa koodhadh si loo ilaaliyo xogta shaqsiyeed, isla markaana barnaamijkayaga ilaalinta xogtu wuxuu haystaa heerarka ugu sarreeya iyo kuwii ugu dambeeyay ee ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed. Marka xogta la helo, ma sii noqoto mid online ah. Laga soo bilaabo isla markii Xafiiska Tirakoobka aruuriyo jawaabiina, muhiimadaya iyo waajibaadka sharci ee nasaaran ayaa ah inaan ilaashanno.

Waxaa naga go'an ilaalinta sirta.

Mareykanka Xafiiska Tirakoobka, waxaan si dhab ah nooga go'an inaan ka dhigno jawaabahaaga qarsoodi. Balanqaadkani wuxuu ka dhigan yahay inay amaan tahay inaad bixiso jawaabahaaga oo aad ogaato in loo isticmaali doono kaliya in lagu tuso tirakoobka qarankeena iyo bulshooyinkanaga.

Ka baro waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Ilaalinta Xogta iyo dhawrista www.census.gov/privacy.

Shuruucda ilaalinta macluumaadka tirakoobka shaqsiyadeed waxay la kulmeen caqabado.

Sanadkii 1982, Mareykanka Maxkamadda Sare ayaa xaqiijisay in xitaa cinwaannada ay yihiin kuwo qarsoodi ah oo aan lagu sheegi karin daahfurnaanta sharciga ama Xeerka Xorriyadda Macluumaadka (FOIA). Sanadkii 2010, Waaxda Caddaaladda MAREYKANKU, waxay go'aamisay in Sharciga Wadaniga (Ptriot Act) uusan ka hor imanayn sharciga ilaaliya sirta jawaabaha tirakoobka shaqsiyeed. Ma jirto maxkamad sharciga oo ka hortegi karta jawaabaha tirakoobka.

United States® Census 2020

Nagala soo xiriir @uscensusbureau